



Hagaha Qoyska ee **Adeegyada Barbaarinta Caruurta Gobolka Washington**

Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA)



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Marka ilmahaagu leeyahay dibu dhac badan, waxaad yeelan kartaa shucuur badan. Waxa laga yaabaa inaad dareentid cabsi, waxa laga yaabaa in aanad rumaysan waxa la yidhi ama aad xataa dareentid cadho. Kuwani maaha shucuur aan caado ahayn, kaligaana ma tihid. Waalidiinta kale ayaa sidoo kale waajaha kuwan ama shucuurtan. Waxa jira barnaamijyo gobolka oo dhan ah oo kaa caawin kara inaad ku xidhnaatid waalidiinta kale ee sidoo kale soo maray shucuurtan ama walaacyadan. Waxaad wici kartaa lambarka kaalmada waalidka ee lagu qoray dhanka danbe ee buugan wixii macluumaad iyo caawimo dheeriya.

Waalidka qaaliga,

Waan ogahay in aad haysatid buug-yarahan, waxaa suurto gal ah inaad waajahaysid walaac khuseeya koritaanka ilmahaaga ama waxa lagu sheegay in ilmahaagu leeyahay dib u dhac koriin.

Waxaan xasuustaa sidaan u warwarsanaa una dawakhsanaa markii gabadhayda, Suzi, ay maraysay baadhitaanka dibu dhaca koriinkeeda. Maan fahamsaneyn kalmadaha aqoonyahano badan isticmaaleen, iskabadaa sida loo helo adeegyadee.

Markii aanu helnay adeegyada, laga helay macalimiin badan oo faa'ido leh iyo dhakhaatiirta daaweynta, koriinkeedu dhabtii wuu horumaray. Waxaan aad uga mahadnaqayaa halkay joogto maanta oo sababteeda ay lahayd barbaarinta ay heshay sanadadaasi adag. Sidoo kale, ku xidhnaanta waalidiinta kale iyo la wadaagista macluumaadku waxay aad muhiim ugu ahayd qoyskayaga.

Waxaan rajeynayaa inaad ugu isticmaali doontid buug-yarahani hage ahaan adeegyada iyo caawimooyinka qoyskaagu u baahan yahay.

Cassie, waalid

Mawduucyada

Hordhac	2
Waa Maxay Barbaarinta Caruurta?	3
Ka waran haddii aan ka qabo su'aalo koriinka ilmahayga?... 4	4
Yaa ku haboon barbaarinta caruurta ee Washington?	5
Maxaa dhacaya marka xigta?.....	6
Maxaa dhaca da'a 3?.....	7
Waa maxay xuquuqahayga Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA)? (Ilaalinta Nidaameed)	8
Ka waran haddii aanan ku raacin go'aanka khuseeya ilmahayga or family's services?	10
Xagee ayaan ka raadsan karaa caawimo ama macluumaad dheeriya?.....	11
Sidee ayaan aad uga qeyb qaadan karaa?.....	12
Waa maxay taasi ka dhigan tahay? (Eray-bixinta)	13
Mahadnaqyo	14



Hordhac

“Markuu ilmahaygu ahaa lix bilood jir, wali muu fadhiisan karayn.

Waxaan u maleeyey inaan sameynaayey wax qaldan. Waxaan u geeyey dhakhtarkeena oo iga caawiyey inaan ku xidhnaado barnaamijka barbaarinta caruurta. Imika wiilkaygu wuxuu helayaa adeegyada dhab ahaantii faa’idada u leh. Wuxuu sameynayaa

horumar wanaagsan, waxaan waxbadan ka baranayaa waxaan qaban karo.

Waan ogahay hadda in aanay ugu wacneyn wax qaldan oo aan sameynaayey oo aanan qaban waxkasta degdega sida ciyaalka kale.”

Heather, waalid



Ujeedada koobaad ee hagahani waa in lagaa siiyo adiga iyo qoyskaagaba guudmar barnaamijka Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT) ee Department of Children, Youth, and Families (Waxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) ee Gobolka Washington. Kaqeybgalka qoyskaaga ee barnaamijka ESIT waa ikhtaarakaaga. Haddii ilmahaagu ku haboon yahay barnaamijka ESIT, adeegyada barbaarinta caruurta ayaa u diyaara ilmahaaga iyo qoyskaaga si ay wax uga qabtaan dibu dhaca koriinka ilmaahag.

Hagahani wuxuu kaa siinayaa macluumaad muhiima oo guud barnaamijka gobolka oo dhan ee ESIT, oo ay ku jiraan tixitaanka qaar ka mida xuquuqdaada waalid ahaan. Sharaxaada dhammeyskatiran ee faahfaahsan ee ilaalinta nidaamka/xuquuqaha waalidka ee adiga iyo qoyskaagu aad heli kartaan ayaa lagu bixinayaa dhukumentiga gaara oo loo yaqaan The Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA) Qeybta C Ilaalinta Nidaameed (Xuquuqda Waalidka).” Markaad akhridid hagahani, family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) ama qofkale oo ka socda barnaamijka ESIT ayaa ka jawaabi kara su'aalaha aad ka qabtid barnaamijka.

Dhammaan dhukumentigani, erayo badan oo caan ku ah barbaarinta caruurta ayaa la adeegsadaa. Haddii aad ka qabtid wax su'aal ah mid ka mida oo aad u baahan tahay sharaxaada, soo rog bogga 13 ee buug-yarahan wixii kalmado eray bixin ah.

Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT) ee Gobolka Washington

Waalidiin ahaan waxaad tahay dadka ugu muhiimsan ee nolosha ilmahaaga. Caruurta waxay u koraan iskuna badelaan degdeg inta lagu jiro saddexdooda sane ee u horeeya. Ka fikir ilmahaaga iyo sida isaga ama iyadu u koraayaan. Si fiican ayaaad u taqaanaa canugaaga. Ogow waxyaabaha tusaale sida iyo markuu canugaagu dhoola cadeeyo, fadhiisto, socdo, u hadlo ama u qabsado koob. Waxaad arkaysaa waa sida canugaagu u koraayo marxaladaha kala duwan ee korniinka. Marka canugu leeyahay dib u dhac korniin, adeegyo ayaa ugu diyaara dhammaan gobolka. Barnaamijka Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT) ee Gobolka Washington wuxuu isku xidhayaa dadaalka gobolka oo dhan si uu uga caawiyo qoyskasu inay helaan adeegyadan.

Waa Maxay Barbaarinta Caruurta?

Adeegyada barbaarinta caruurta waa adeeyo horumarineed, oo lagu bixiyo kormeerka dadweynaha, iyo deegaan dabiici ah. Waxaa loo qaabeeyey si ay u daboolaan baahiyaha koriinka ee dhallaanka ama socod baradka ee xaqa u leh waxaana loo qaabeeyey in ay caawiyaan waalidiinta in ay ka caawiyaan ilmahooda korriinka iyo barashada.

Barbaarinta caruurta (inta lagu jiro sanadaha ugu horeeya ee nolosha ilmaha) waxay samayn kartaa farqi weyn iyadoo kaa caawinaya:

- ▶ Raadi adeegyada uu u baahan yahay ilmahaaga.
- ▶ Faham horumarka koritaanka ilmahaaga.
- ▶ Taageer waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga iyo ka qaybgalka guusha leh ee guriga iyo hawlaha bulshada.

Waa maxay ujeedada barbaarinta caruurta?

Ujeedada barbaarinta caruurta waa in la dhiso awooda qoyska iyada oo la siinayo iskudubarid, taageerooyin, agab, iyo adeeyo si kor loogu qaado horumarka carruurta leh dib u dhac koritaaneed iyo naafada iyada oo loo marayo fursadaha waxbarasho ee maalinlaha ah.

Si qoysaska awood loogu siiyo inay daryeelaan ilmahooda oo ay ka qayb qaataan hawlaha qoyska iyo bulshada, qoysasku waxay:

- ▶ Ogow xuquuqdooda.
- ▶ Si wax ku ool ah ugu gudbiyaan baahiyaha ilmahooda.
- ▶ Ka caawi ilmahooda inay koraan oo waxbartaan.

Si loo caawiyo carruurta inay noqdaan kaqaybgalayaal firfircoon oo guulaysta meelo kala duwan iyo xaalado, carruurta waxay muujin doonaan horumar:

- ▶ Xirfadaha dareenka bulshada iyo xidhiidhka bulshada ee togan.
- ▶ Helitaanka iyo isticmaalka aqoonta iyo xirfadaha ay ku jiraan luqadda iyo wada xidhiidhista.
- ▶ Istickmaalka dabeecadaha ku habboon si ay u daboolaan baahidooda.



Waa maxay Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA)

Sanadkii 1986 Congress ayaa waxkabadalay sharciga loo yaqaano Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA) oo abuuray barnaamij lagu dhiirigaliyo dawladdaha si ay u horumariyaan una hirgeliyaan nidaamka adeegyada barbaarinta caruurta ee gobolka oo dhan oo ay kujiraan carruurta naafada ah iyo qoysaskooda. Sharcigu wuxuu soo saaray heerar ay dawladdu raacaan si ay u bixiyaan adeegyada qoysaska caruurta yar-yar haysta iyo kuwa naafanimada leh. Gobol kastaa wuxuu go'aansadaa sannad kasta haddii ay sii wadi karto bixinta adeegyada barbaarinta caruurta sida lagu qeexay IDEA. Department of Children, Youth, and Families (Waxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT) barnaamijku waxa uu hagayaa isuduwidda nidaamka gobolka oo dhan ee adeegyada barbaarinta caruurta.

Adeegyada barbaarinta caruurta waxa loo qaabeeyey si ay u daboolaan baahiyaha korriinka ee ilmo kasta oo u qalma iyo baahiyaha qoyska ee la xidhiidha kor u qaadida koriinka ilmaha.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan luqadda dhegoolaha, waa in mid lagu siiyaa. Haddii aadan ku hadlin Ingiriisi, waa in turjumaan lagu diyaariyaa, ilaa aysan si cad u suurto gal ahayn.

Maxaa dhacaya haddii aan qabo su'aalo ku saabsan korriinka ilmahaaga?

Wac family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) ee goobtaada. Waxa jira FRC-yo degmo ama deegaankasta. Doorhoodu waa inay qoyskaaga ka caawiyaan inay helaan adeegyada barbaarinta caruurta ee ilmahaagu u baahan karo. Si aad u ogaato magaca hogaanka deegaankaaga FRC, kawac Family Health Hotline (Khadka Caafimaadk Qoyska) lambarka 1-800-322-2588. Waxaad sidoo kale wici kartaa waaxda caafimaadka deegaankaaga ama dugsiga degmada.

Kala hadal daryeel bixiyahaaga caafimaad wixii dhibaatooyinkaaga ah. Isaga ama iyadu waxay bixin karaan baadhis ama waxay soo jeedin karaan agab kale. Haddii aanad lahayn dhakhtar oo aad rabto macluumaad dheeraad ah ama caawimo, kawac Family Health Hotline (Khadka Caafimaadka Qoyska) lambarka xaga sare ku xusan. Uma baahnid gudbin dhakhtar si aad u hesho adeegyada barbaarinta caruurta. Waxaa laga yaabaa inaad adigu isu tilmaanto waalid ahaan.

Waa maxay baadhistu?

Baadhistu waa eegid deg-deg ah oo lagu samaynayo sida ilmahaagu wax u baranayo una korayo. Baadhitaannada waxaa sameeya dad loo tababaray inay go'aamiyaan sida ilmahaagu u korayo. Haddi korriinka ubadkaagu yahay mid tabasho aad kaqabto, FRC-gaadu waxay wadaagi kartaa macluumaadka ku saabsan sida loo helo qiimayn ilmahaaga.



Waa maxay qiimayntu?

Qiimayntu waxay si qoto dheer u eegi doontaa horumarka ilmahaaga. Qiimaynta waxa lagu samaynayaa adiga, ilmahaaga iyo xirfadlayaasha barbaarinta caruurta.

Qiimayntu waxay eegaysaa dhinacyadan koritaankooda:

- ▶ Garashada - awooda wax lagu barto iyo sida ilmahaagu wax u barto
- ▶ Jidh ahaan - awood uu ku dhaqaaqo, wax ku arko oo ku maqlo
- ▶ Wadaxidhiidhista - awoodda fahamka luqadda iyo sharaxaada baahiyaha
- ▶ Bulsho ama shucuureed - awooda uu kula xidhiidho dadka kale
- ▶ Xirfadaha la qabsiga - awood uu ku labisto, wax ku cuno si iskii ah ama uu u daryeelo naftiisa ama nafteeda.

Qiimayntu waa hab lagu arko haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada barbaarinta caruurta. Qiimaynta waxay ku dhici doontaa kaliya marka la helo ogolaanshahaaga qoraalka ah oo wax kharash ah adiga aan kugu kacayn.

Tallooyinka qorsheynta qiimeynta:

- ▶ Weydii family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) haddaad u baahato caawin.
- ▶ Keen wixii su'aalo ah ama walaac ah oo aad ka qabto koriinka ilmahaaga.
- ▶ La wadaag dhammaan macluumaadka aad u malaynayso inay muhiim yihiin: diiwaannada caafimaadka, buugga ilmaha, shaxda koritaanka ama warbixinnada kale.
- ▶ Go'aanso wakhtiyada ama goobaha kuu shaqayn doona adiga iyo qoyskaaga.
- ▶ Ku martiqaad xubnaha kale ee qoyska, saaxiib ama qof ku caawiya haddii aad rabto.
- ▶ La socodsii FRC-gaaga haddii aad u baahan tahay turjumaano ama caawimo kale.

Qiimaynta ka dib, adiga iyo xubnaha kale ee kooxda waxaad ka hadli doontaan waxa ilmahaagu qabanayo oo aad garan doontaan waxkasta oo wel-wel keeni kara. Haddii ay jiraan meelo dib u dhac ah, ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu u qalmo adeegyada barbaarinta caruurta. Adiga ayaa ikhtiyaar u leh inaad hesho ama aadan helin adeegyadan.

Yaa u qalma barbaarinta caruurta ee Washington?

Si uu xaq ugu yeesho, ilmuhu waa in uu dib u dhac ku yimaadaa boqolkiiba 25 ama tusiyaa 1.5 isbedel ka hooseeya da'diisa mid ama in ka badan oo ka mid ah meelaha koriinka. Ilmuhu waxa kale oo laga yaabaa inuu u qalmo haddii isaga ama iyada ay leeyihiin xaalad jidheed ama maskaxeed, sida xanuunada Down syndrome-ka, taas oo la og yahay inay keento dib u dhac korriin ah.

Waa maxay qiimayntu?

Qiimayntu waa ururinta macluumaadka adiga lagaa helo, kuwa kale ee yaqaan ilmahaaga, iyo hababka ay bixiyayaasha barbaarinta caruurta u isticmaali karaan si ay u fahmaan dhaqanka iyo dabeecada ilmahaaga ee koritaanka samaynaya caadiyan iyo hawlo badan oo caadi ah. Qiimayntu waxay eegaysaa sida ilmahaagu u barto xirfado cusub, sida uu isagu ama iyadu ula xidhiidho dadka kale iyo waxa uu jecel yahay iyo sidoo kale waxa isaga ama iyada u arkaan inay ka niyad jabaan ama caqabad ku yihiin. Macluumaadka qiimayntu waxa ay adiga iyo kooxdaada ka caawin doonaa in aad go'aansataan natiijooyinka (isbedelka) aad rabto in aad ka shaqayso iyo adeegyada iyo taageerada kaa caawin kara gaadhista natiijooyinkaas.

Qiimaynta waxa kale oo ka mid ah hababka socda ee loo isticmaalo in lagu go'aamiyo horumarka ilmahaaga ee ku wajahan gaadhista natiijooyinka iyo in la hubiyo in adeegyada iyo taageerada aad helayso ee ka caawinaya ilmahaagu inuu horumar sameeyo.



Maxaa dhacaya marka xigta?

Individualized Family Service Plan (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga ah, IFSP)

Haddii uu u qalmo, ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu helo adeegyada barbaarinta caruurta ee IDEA. Waxaad kulan la yeelan doontaa family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) iyo adeeg bixiyayaasha kale. Qoyskaaga, iyo kuwa kale, ayaa qori doona qorshe, oo loo yaqaan Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeega Qoyska ee Shaqsiga ah, IFSP). La shaqee FRC-gaaga si aad u hubiso in qorshaha ka tarjumaya wel-welka, danaha iyo qiyamka qoyskaaga.

Adeegyadu waxay bilaabmaan markaad ku raacdo IFSP oo aad ogolaato adeegyada.

IFSP waa nidaam socda kaas oo buuxinaya baahiyaha isbeddelka ee ilmahaaga iyo qoyskaaga. Dib ayaa loo eegaa ugu yaraan lixdii biloodba mar waxaana dib loo qoraa sanad walba.



IFSP waxaa ka mid ah:

- ▶ **Heerarka shaqo ee hadda** - waxa ilmahaagu hadda ku sugan yahay.
- ▶ **Bayaanka qoyska** - bayaan ku saabsan wel-welka qoyskaaga, mudnaanta iyo agabka; Bayaanka qoyskaagu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah IFSP, laakiin waxaad dooran kartaa inaad mid lahayn.
- ▶ **Natijjooyinka** - isbeddellada aad rabto inaad ku aragto ilmahaaga iyo qoyskaaga.
- ▶ **Adeegyada barbaarinta caruurta ee loo baahan yahay** - inta jeer iyo inta ay le'eg tahay, meesha ay ka dhacayaan, iyo cidda bixin doonta iyaga (ilo badan oo kala duwan ayaa maalgeliya adeegyada barbaarinta caruurta). Waxa laga yaabaa inaad aqbasho ama diido adeeg kasta oo lagu fidiyo (marka laga reebo isku-duwidda ilaha qoyska) haddii aad ka qaybqaadanayso barnaamijka barbaarinta caruurta.
- ▶ **Deegaannada dabiiciga ah** - bayaan ku saabsan deegaanka dabiiciga ah ee adeegyada barbaarinta caruurta lagu bixin doono. IFSP-yadu waa inay ku jiraan caddayn qoraal ah haddii adeegyada aan lagu bixinayn deegaan dabiici ah.
- ▶ **Jadwalka waqtiyada** – marka ay adeegyadu bilaabmaan iyo markay dhammaan doonaan, iyo marka aad dib u eegi doonto qorshahaaga.
- ▶ **Adeegyada kale ee loo baahan yahay ee aan laga maalgelin IDEA** - yaa kaa caawin kara inaad hesho adeegyadan.
- ▶ **family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC)** – ee lagu magacaabay qorshahaaga.
- ▶ **Qorshaha kalaguurka ka hor da'da 3** - raadinta iyo qorsheynta adeegyada ka dib marka ilmahaagu gaadho 3 sano.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad ku martiqaado xubnaha kale ee qoyska, saaxiib ama qof kaa taageera kulanka. Keen macluumaad kasta oo ku saabsan ilmahaaga oo aad u aragto inay muhiim tahay.

Maxaa dhaca da'da 3?

Ugu yaraan lix ilaa sagaal bilood ka hor inta aanu ilmahaagu gaadhin da'da 3, family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) ayaa kaa caawin doona inaad qorshayso u dhaqaaqida adeeg bixiyaha xiga ama wakaalada u adeegaysa ilmahaaga. Tani waxay bedeli kartaa halka iyo sida adeegyada loo bixiyo. Barbaarinta caruurta, isbeddelkan waxa loo yaqaan kalaguurka. IDEA waxay u baahantahay qorshe qoraal ah oo ku saabsan kalaguurka. Kulanka qorshaha kalaguurka waa in uu dhacaa ugu yaraan 90 maalmood ka hor inta uusan ilmahaagu gaadhin da'da 3. Qorshahaaga kalaguurka waxa uu aqoonsan doonaa waxbarashada gaarka ah ama adeegyada bulshada ku salaysan ee ilmahaagu u baahan karo.

FRC-gaagu waxay ku waydiin doontaa inaad saxeexo foom oggolaansho, si wakaalada ama bixiyaha adeega xiga lala xidhiidhi karo si loo qorsheeyo kalaguurka. Kulan u dhexeeya adiga, FRC-gaaga, adeeg bixiyayaasha, iyo dugsiga degmada ayaa la samayn doonaa.

Dugsiga degmada ayaa go'amisa haddii ilmahaagu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta. Waxay kaala hadli doonaan natijoooyinka imtixaanadooda waxayna ku siin doonaan macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada. Haddii ilmahaagu u qalmo, adeegyadooda waxaa lagu bixin doonaa barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP).

FRC-gaaga ayaa kaa caawin doona qorsheynta u dhaqaaqida adeegyada kale ee suurtagalka ah haddii ilmahaagu aanu u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiga barbaarinta.

Tallooyin ku saabsan kulanka kalaguurka:

- ▶ Soo ururi macluumaadka ugu badan ee suurtagalka ah ee ku saabsan isbeddelka la soo jeediyay.
- ▶ Weydii fursadaha barnaamijka ama doorashooyinka suurtagalka ah.
- ▶ Weydii waxa tababbarka iyo taageerrada barnaamijka cusub siinayo qoysaska.
- ▶ Booqo barnaamijka cusub ka hor isbeddelka.
- ▶ Weydiiso agab qoran oo baro hababka gelitaanka iyo ka qaybgalka barnaamijka cusub.
- ▶ Sii macluumaadka ku saabsan ilmahaaga intii suurtagal ah barnaamijka cusub.



Waa maxay xuquuqahayga Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA)?

(Ilaalinta Habraaca)

Inta badan sharciyada waxaa ku jira xuquuqda muwaadiniinta IDEA-na kama duwana. family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) ayaa kusiin doona “Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA) Qeybta C Habraaca Badqabka (Xuquuqda Waalidka)” oo sharxaysa xuquuqdaada.

Tusaalooyinka xuquuqahaaga hoos yimaada IDEA waxaa ka mid ah xuquuqdaada:

- ▶ Noqo go'aamiyaha aasaasiga ah iyo kan ugu dambeeya ee ilmahaaga.
- ▶ Helitaanka adeegyada ay ka mid yihiin:
 - Aqoonsashada tabashooyinka xilli hore/Raadinta ilmaha
 - Qiimaynta iyo qiimayn dhinacyo badan leh oo muddaysan
 - Go'aminta u qalmiitaanka ilmahaaga
 - Family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC)/isku-duwidda Khayraadka Qoyska

Haddii ilmahaagu u qalmo, waxaad xaq u leedahay:

- ▶ Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeega Qoyska ee Shaqsiiga ah, IFSP).
- ▶ Iskuduwidda ilaha qoyska ee socda ee FRC, ilaa ilmahaagu ka gaadhayo dhalashadiisa saddexaad.
- ▶ Weydiiso family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC).
- ▶ Hel adeegyada barbaarinta caruurta ee la xidhiidha horumarka ilmahaaga.
- ▶ Aqbal ama diid adeegyada ilmahaaga iyo qoyskaagu heli doonaan sida ay go'aamisay IFSP.
- ▶ Diid qaar ka mid ah adeegyada ay ku taliyeen kooxda IFSP welina waxaad heli kartaa adeegyo kale (marka laga reebo adeegyada FRC).
- ▶ Ka qaybgal dhammaan shirarka khuseeya adeegyada barbaarinta caruurta ee ilmahaaga iyo isbeddelada bixinta adeegyada.
- ▶ Wakhti sii kulamada oo kula qaado qoyskaaga goob ku raali galiyanaysa.
- ▶ Hel ogeysiisyada iyo dhukumentiyada IFSP ee afkaaga hooyo ama habka isgaadhsiinta ee gurigaaga lagu isticmaalo.





Waxa kale oo aad haysataa ilaalin ku saabsan diiwaanada barbaarinta caruurta ee ilmahaaga. Kuwaas waxaa ka mid ah xuquuqdaada:

- ▶ Inaad dib u eegto diiwaanada oo codsato wax ka bedelka diiwaanada.
- ▶ Hesho nuqullada diiwaanka.
- ▶ In lala socodsiiyo noocyada iyo goobaha diiwaannada la ururiyey, lagu hayo ama lagu isticmaalo barnaamijka, cidda barnaamijka gelin karta diiwaannadaas, iyo marka ay arkaan diiwaannadaas.
- ▶ Codso macluumaadka ku saabsan cidda arkay diiwaannada ama nuqullada diiwaannada.
- ▶ Loolanka macluumaadka ku jira diiwaanka aad aaminsan tahay inuu khaldan yahay ama marin habaabinayo ama ku xad-gudbaya gaadhnimada ama xuquuqda ilmahaaga ama qoyskaaga. Diiwaanka barbaarinta caruurta ee ilmahaaga waxaa ka mid ah, waxyaabo kale:
 - Warbixinada baadhista
 - Warbixinada qiimaynta
 - Macluumaadka qiimaynta
 - Go'aaminta ku habboonaanshaha
 - Dhammaan macluumaadka ka tirsan IFSP

Macluumaadka qoyskaaga waa qarsoodi.

Waxaad xaq u leedahay:

- ▶ Qarsoodnimada macluumaadka shakhsi ahaaneed iyo kuwa la aqoonsan karo oo ay ku jiraan:
 - Magaca ilmahaaga, naftaada ama xubnaha kale ee qoyska.
 - Ciwaanka ilmahaaga.
 - Sifooyin kasta oo shakhsi ah ama macluumaad kale oo suurtoagal ka dhigaya in lagu aqoonsado ilmahaaga si macquul ah.
- ▶ Codso siyaasadaha deegaanka iyo nidaamyada ku saabsan sida qarsoodiga loo ilaaliyo.
- ▶ Bixi ogolaansho qoraal ah oo xog ogaal ah oo ku saabsan beddelka ama wadaagga macluumaadka ama diiwaannada.

Marka lagu daro xuquuqda waalidka/qoyska, carruurta waxay xaq u leeyihiin waalid ku meel gaadh ah haddii:

- ▶ Wax waalid ah aan la aqoonsan karin.
- ▶ Adeeg bixiyaha/hay'adda dadwaynaha, dadaal macquul ah ka dib, ma ogaan karaan halka uu waalidku joogo.
- ▶ Ilmaha waxa ilaalinaya gobolka.



Ka waran haddii aanan ku raacin go'aanka khuseeya ilmahayga ama adeegyada qoyska?

Fadlan kala hadal family resources coordinator (iskuduwaha khayraadka qoyskaaga, FRC) waxyaabaha ku saabsan dhibaataada jirta. Haddii taasi shaqayn waydo ama aanad ku qanacsanayn, waxaad dooran kartaa inaad isticmaasho mid ama dhammaan xulashooyinka soo socda:

- ▶ **Dhex-dhexaadin** – Dhex-dhexaadinta ayaa lagugu siin doonaa lacag la'aan si ay gacan uga geysato xallinta khilaafka. Dhexdhexaadinta waxa loo siiyaa si loo helo beddelka dhegaysi maamul oo rasmi ah. Dhexdhexaadintu waa hab ikhtiyaari ah.
- ▶ **Adeegyada u doodista** – Kuwani waa barnaamijyo ku siin doona macluumaad oo kaa caawin doona inaad qorsheyso sida aad wax uga qabato dhibaataada. Hal urur oo u doodis bixiyaa waa PAVE (eeg bogga 11). FRC-gaaga ayaa ku siin kara macluumaadka ku saabsan adeegyada u doodista ee degaankaaga.
- ▶ **Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq dhowrka leh (socodka)** - Kani waa dhegeysi rasmi ah ama dacwad uu qabto sarkaalka maamulka dhegeysiga. Codsiga dhegeysiga maamulka waa inuu ahaadaa qoraal oo ay ku jiraan cabashada. Ku hagaaji codsiga agaasimaha bixiyaha adeegyada barbaarinta ama qandaraaslaha adeegyada barbaarinta ee deegaankaaga. FRC-gaaga ayaa ku siin kara magacyadooda iyo cinwaanadooda ama waxaad iimayl ku diri kartaa esit@dcyf.wa.gov oo weydiiso caawimo.

Waalid kasta, qof kale ama hay'ad kasta ayaa xerayn kara cabasho maamul haddii ay u malaynaayan in wakaalad ama bixiyaha adeegyada barbaarinta caruurto uu ku xadgudbayo shuruudaha sharciga. Cabashada waa in la qoraa, saxaaxaa oo lagu daraa xaqiiqooyinka ku saabsan cabashada.

U dir cabashada:

Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka)

Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska)

PO Box 40970

Olympia, WA 98504-0970

Cabashada dib ayaa loo eegi doonaa waxaana lagu qori doonaa jawaabta 60 maalmood gudahood.



Halkeen aan kaheli karaa caawimo ama macluumaad dheeraad ah?

Ururada iyo kooxaha soo socdaa waxay ku siin karaan macluumaad dheeraad ah, gargaar iyo taageero:

Family Health Hotline (Khadka Caafimaadka Qoyska)

1-800-322-2588

www.withinreachwa.org

Khadkaan taleefanku wuxuu hayaa macluumaadka hadda jira ee ku saabsan ilaha barbaarinta caruurta ee dadwaynaha iyo kuwa gaarka ah, oo ay ku jiraan Family Resources Coordinators (Iskuduwaha Khayraadka Qoyskaaga, FRCs). Waxa kale oo ku jira macluumaadka ku saabsan tallaalka, nafaqada iyo adeegyada kale ee caafimaadka carruurta ee laga heli karo Washington.

Department of Children, Youth, and Families (Waxda Caruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, DCYF)

Barnaamijka Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT)

limayl: esit@dcyf.wa.gov

www.dcyf.wa.gov

Waxay hagtaa nidaamka gobolka oo dhan ee IDEA, Qaybta C adeegyada barbaarinta caruurta.

Waalid ilaa Waalid kale

1-800-821-5927

www.arcwa.org

Shabakada waalidka gobolka oo dhan ayaa siisa taageero shucuureed iyo macluumaadka waalidiinta haysta carruurta yar-yar ee naafada ah ama dib u dhaca korriinku ku dhacay.

Shabakada Aabayaasha Gobolka Washington

425-747-4004 ext. 218

<https://fathersnetwork.org>

Latalinta iyo siinta taageerada iyo khayraad guud ahaan dadkoo dhan iyo qoysaskooda kuwasoo haysta caruurta qabta baahiyaha gaarka ah.

Washington PAVE (Partnerships for Action, Voices for Empowerment (Iskaashatada Codka Waxqabadka ee Awood siinta))

1-800-5PARENT

wapave.org

Xarunta tababarka waalidiinta ee gobolka oo dhan oo bixisa caawinta qoysaska haysta caruur naafo ah, dada dhalashada ilaa qaangaadhnimada.



Sidee ayaan aad uga qeyb qaadan karaa?


Waxaad door muhiim ah ku leedahay qorsheynta iyo horumarinta barnaamijyada iyo adeegyada ilmahaaga. Waxa kale oo aad ka qayb qaadan kartaa qorshaynta sida bulshadaadu u bixiso adeegyada.

Qorshahan waxaa lagu sameeyaa heer degmo iyadoo loosii marayo County Interagency Coordinating Councils (Golaha Isdudwada Wakaaladaha Gobolka, CICC). CICC kasta waxaa looga baahan yahay inay waalid ahaan xubno ku yeeshaan golaha. Si wadajir ah dhammaan xubnaha kale, waalidiintu waxay caawiyaan go'aan ka gaadhista sida ugu wanaagsan ee adeegyadu u dhici karaan. Kulamada CICC waxay u furan yihiin dadweynaha.

Sidoo kale waxa jira State Interagency Coordinating Council (Golaha Iskuxidhka Wakaaladaha Gobolka, SICC). Golahani sidoo kale waa inuu lahaadaa wakiil waalid. Kulamada SICC waxay u furan yihiin dadweynaha. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakhtiyada kulanka iyo goobaha la xidhiidh Family Resources Coordinator (Iskuduwaha Khayraadka Qoyskaaga), ESIT, ama booqo wabsaaytka www.dcyf.wa.gov.

Bug-yarahaan waa soo koobista barnaamijka Early Support for Infants and Toddlers (Barbaarinta Caruurta iyo Socod Baradka, ESIT) ee Gobolka Washington. Si aad u hesho faahfaahin buuxda oo ku saabsan qorshaha Washington ee la ansixiyay ee hoos timaada IDEA ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan midkood CICC ama SICC, kala xidhiidh barnaamijka Washington State Early Support for Infants and Toddlers (Kaalmaynta Caruurta yar-yar iyo Kuwa Raadqaadka ah ee Gobolka Washington)t esit@dcyf.wa.gov.

www.dcyf.wa.gov



Maxay taasi ka dhigan tahay? (Eray-bixinta)

Aaladda Caawinta Tikniyojyada

Shay kasta, qayb ka mid ah qalabka ama nidaamka alaabaha loo isticmaalo in lagu kordhiyo, lagu ilaaliyo ama lagu hagaajiyo awooda ilmahaaga inuu wax sameeyo (tusaale, wax cuno, xidhiidh, dhaqaaqa).

Adeegga Caawinta Teknolojyada

Adeeg si toos ah u caawiya ilmaha naafada ah si uu u doorto, u helo ama u isticmaalo qalab tignoolajiyada caawiya.

Baadhitaan

Liis hubin degdeg ah ama xog ururuin ku saabsan korriinka ilmahaaga si loo eego haddii qiimaynta dheeraad ah loo baahan yahay.

Barbaarinta Caruurta

Ururinta adeegyada ay bixiyaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo loogu qaabeeyey sharci si ay u taageeraan carruurta iyo qoysaska xaqa u leh si kor loogu qaado awoodda koritaanka iyo korriinka ilmaha laga bilaabo dhalashada ilaa da'da 3.

Bayaanka Qoyska

Warbixin ku saabsan wel-welka qoyska, mudnaanta iyo agabka oo ay ku jirto qoyska Individualized Family Service Plan (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga ah, IFSP).

Bedelka Waalidka

Shakhsi ay magacaabeen wakaalada deegaanka ama gobolka si uu ugu dhaqmo bedelka waalidka ama masuulka sharciga ah si loo ilaaliyo xuquuqda ilmaha ee habka go'aan qaadashada.

Caruurta yar-yar iyo Kuwa Raadqaadka ee Naafada ah

Carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa 3 sano jir kuwaas oo u qalma adeegyada barbaarinta caruurta sababtoo ah waxay la kulmaan inay ka fogaadaan halkii loo baahnaa ilaa qiyaas gaadhaysa 1.5 ama ugu yaraan boqolkiiba 25 dib u dhac koriin ah mid ama in ka badan oo ka mid ah meelaha soo socda: garashada, jidhka, wada xidhiidhista, bulshada/dareenka ama la qabsiga; ama uu leeyahay xaalad jidheed ama maskaxeed oo la ogaaday taasoo leh ixtimaal sare ee keeni kara dib u dhac koriin.

Deegaanada Dabiiciga ah

Goobaha dabiiciga ah ama caadiga ah ee ay ku sugan yihiin caruurta ay isku da'da yihiin ilmaha kuwaasoo aan naafada lahayn. Tan waxa ku jiri kara guriga, xaafadda ama goobaha bulshada.

Dhagaysiga Maamulka

Nidaam rasmi ah oo lala yeesho qof dhexdhexaad ah, sarkaalka dhegeysiga, kaasoo dhegaysiga caddaynta iyo doodaha waalidka/qoyska iyo hay'adaha oo go'aamiya cidda saxda ah iyo cidda ay tahay inay wax sameeyaan.

Dhexdhexaadinta

Nidaam aan rasmi ahayn oo qof tababaran, oo aan cidna u eexanayn uu ka caawin karo dhinacyada isku dhaca inay xalliyaan khilaafaadkooda oo ay u helaan xal lagu qanci karo dhammaan dhinacyada.

Individualized Family Service Plan (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiga ah, IFSP)

Qorshaha qoran ee siinta barbaarinta caruurta iyo adeegyada kale ee carruurta iyo qoysaska xaqa u leh kuwaasoo: (1) ay si wadajir ah u horumariyaan qoyska iyo xirfadlayaasha ku habboon; (2) waxay ku salaysan tahay qiimaynta anshaxa badan iyo qiimaynta ilmaha iyo qoyska; (3) wuxuu leeyahay bayaan ku wajahan qoyska oo ku saabsan agabka, mudnaanta iyo wel-welka haddii qoysku rabo; iyo (4) waxaa ku jira adeegyada lagama maarmaanka u ah kor u qaadista koriinka ilmaha iyo awoodda qoyska si uu u daboolo baahidiisa koritaan.

Natijoyinka

Bayaannada isbeddellada aad rabto inaad ku aragto ilmahaaga ama qoyskaaga taasoo ka dhalatay adeegyada barbaarinta caruurta. Bayaanadani waa qayb ka mid ah IFSP kaaga.

Nidaamka Anshaxa

Ku lug lahaanshaha laba ama in ka badan oo culuumta ama xirfadaha bixinta adeegyada isku dhafan iyo isku dubaridka oo ay ku jiraan qiimaynta iyo hawlaha qiimaynta, iyo horumarinta IFSP.

Qiimaynta

Nidaamyada ay isticmaalaan xirfadlayaasha aqoonta u leh si ay u go'aamiyaan xaq u yeelashada bilowga iyo tan sii soconaysa ee ilmaha, kuwaas oo diiradda saaraya go'aaminta xaaladda ilmaha ama socod baradka ee dhammaan dhinacyada korriinka; garasho, bulsho/dareen, jidheed (ay ku jiraan aragga iyo maqalka), wada xidhiidhista iyo la qabsiga.

Qiimeynta

Nidaamyada socda ee ay adeegsadaan xirfadlayaal aqoon u leh inta lagu jiro waayo-aragnimada barbaarinta caruurta ee ilmaha si loo aqoonsado baahidiisa gaarka ah; agabka qoyska, mudnaanta iyo wel-welka la xidhiidha horumarkiisa; iyo nooca iyo baaxadda adeegyada barbaarinta caruurta ee loo baahan yahay si loo daboolo baahiyahan.

Qorshaha Kalaguurka

Qorshaha loo sameeyay ilmahaaga markuu ka tagayo adeegyada barbaarinta caruurta ee da'da 3.

Raadinta Ilmaha

Waxa ku jira aqoonsiga hore, baadhista, gudbinta iyo isku-duwidda adeegga bilowga ah.

Xarunta Daryeelka Qoyska

Mabda'a kor u qaadaya in waalidiinta ay yihiin go'aan gaadhayaal oo dhisaya iskaashiga waalidka/xirfadlayaasha.

Mahadcelin

Kooxda shaqada ee Tilmaamaha Qoyska, oo ah guddi ka mid ah State Interagency Coordinating Council (Golaha Iskuxidhka Wakaaladaha Gobolka, SICC) lagu sameeyay buug-yarahan.

Ujeeddadeedu waa in lagu caawiyo waalidiinta dhallaanka iyo socod-baradka naafada ah inay fahmaan adeegyada barbaarinta caruurta ee hoos yimaada Individuals with Disabilities Education Act (Xeerka Waxbarashada Shaqsiyaadka Laxaadka la'a, IDEA).

Waxaan aad ugu mahad naqayaa xubnaha guddida saacadaha ay ku bixiyeen horumarinta hagahan:

Donna White, Gudoomiyaha

Department of Health (Waxda Caafimaadka),
Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka

Catherine Davis

Us-Qwed-Eeth, Puyallup Tribe
Bilaabista Lix Mashruuc

Heather Hebdon

Mashruuca Specialized Training of Military
Parents (Tababarka Gaarka ah ee Waalidiinta
Ciidanka, STOMP)

Kathy Hormann

Xarunta Koriinka Ilmaha, Sumner

Cassie Johnston

Washington PAVE,
Iskuduwaha Ka Qaybqaadashada Waalidka

Lynne Leeper

Washington PAVE, Mashruuca Tababarka Waalidka

Melanie Stafford

Us-Qwed-Eeth, Puyallup Tribe
Bilaabista Lix Mashruuc

Kathy Blodgett, Shaqaale

Department of Social and Health Services
(Waxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka),
Barnaamijkii hore ee barbaarinta caruurta
raadqaadka ee Gobolka Washington

Barbie Faubion, Shaqaale

Department of Social and Health Services
(Waxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka),
Barnaamijkii hore ee barbaarinta caruurta
raadqaadka ee Gobolka Washington

Waxaa mahad leh waalidiinta kale iyo xirfadlayaasha wadaagay fikradahooda oo ay ka mid yihiin:

Rita Dickey, Linda Gil, Terri Larson, Kathy Lollar, Julie Martino, Kathie Moudy, Joni Strong, Diana Sandoval iyo Debbie Yanak.

Waxaan mahad gaarka ah siinayaa gobolada Maryland iyo Pennsylvania kuwaas oo buug-yarahoodu u adeegeen sidii nidaamyada hagaha Washington.



DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov